



BIG HOUSING BUILD

Wixii kusoo cusboonaaday
Bulshada Flemington

Waad ku mahadsan tahay ra'yiga aad nala wadaagtay ee ku saabsan marxaladda xigta ee dayactirka Flemington

Waxaan bulshada ka codsanay inay nala wadaagaan ra'yigooda ku saabsan qorshayaasha la soo bandhigay ee loogu talagalay mashruuca Racecourse Road, Flemington.

Mashruucani wuxuu soo jeediyey 800 oo gurya cusub ah, oo ay ku jiraan ugu yaraan 400 oo guri oo ah guryo bulsho kuwaas oo ku kala oolaan doonaa 2 dhisme oo cusub.

Afar kalfadhi iyo lix kulan oo dadka arimahan daneeya ah ayaa waxaa ka soo qeybgalay in ka badan 150 qofood. Waxaan sidoo kale dhageysanay 100 qof oo fikradahooda noogu soo gudbiyay khadka internet ka.

Waxaan weydiinay ra'yiga ku aadan:

- Dhismayaal iyo guryo cusub
- Abuurista xaafad amni fiican oo soo jiidasho leh
- Ku dhex socodka goobta guryaha Flemington
- Goobaha bulshada ee gudaha iyo dibada

Waad ku mahadsan yihiin dhamaan intii ka qeyb-qaadatay wadatashiga.

Maxaa xiga oo dhici doona?

Warbixin loo gudbiyay Wasiirka Qorshaynta ayaa waxaa qeyb ka ahaa ra'yigii ay bulshada nala soo wadaageen. Tani waa qayb ka mid ah codsiga qorshaynta. Marka la ogaado natiijada codsiga qorsheynta la ogaado, waxaanu warbixinta wadatashiga la wadaagi doonaa mareegaha Hawlgalka Victoria ee bulshada.



Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga



Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/flemington-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi Homes Victoria

Waad ku mahadsan tahay ra'yigaaga aad nala wadaagtay

Waxaan dhageysanay ra'yiga in ka badan 250 qof kaas oo ku saabsan marxaladda xigta ee la soo jeediyay ee lagu cusbooneysiinayo Flemington.

Howlihii shaqo ee laga waday barxada cusub ee Murnalung Park ayaa meel fiican maraya

Dhir meesha lagu beerayo iyo qurxin ayaa socota, iyadoona la filayo in barxada la furo bilaha soo socda.

Kaabayaasha goobta oo ay shaqo ka socoto

Hawlo shaqo oo lagu dayactirayo kaabayaasha dhaqaalaha ee goobta ayaa socon doona xilliyo kala duwan, iyadoo isbeddello lagu sameynayo baarkinka, meelaha ay gaadiidka iyo dadka lugeynaya kasoo galayaan. Tilmaamaha dadka haga ayaa goobta ooli doona si ay kaaga caawimaan inaad tagto meesha aad u socoto.



Maxaa ka socda Flemington

Juun 2026




Holland Court: 286 guri oo cusub iyo barxad loogu talagalay dadweynaha

Shaqo ayaa meesha ka socoto

- Hubinta tayada shaqada ayaa laga bilaabayaa guryihii ugu horreeyay
- Shaqo ayaa waxay ka socotaa barxada dadweynaha

Howlaha shaqo

- Shaqooyin la qaban doono saacado ka baxsan saacadaha caadiyan la shaqeeyo oo ay ku jiraan maalmaha Sabtida iyo Axada



126 iyo 130 Racecourse Road

Howlo shaqo oo waxyaabaha korontada la xiriira

- Hawlo shaqo oo koronto ah ee Nidaamyada Digniinta Xilliyada Hore ah ayaa sii socon doona

120 Racecourse Road

Sugidda dhismayaasha

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Muunado (samples) yar ayaa laga qaadi doonaa guryaha la faaruqiya, marinnada, meelaha wiishashka iyo meelaha ka baxsan dhismaha

12 Holland Court

Sugidda dhismayaasha

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Muunado (samples) yar ayaa laga qaadi doonaa guryaha la faaruqiya, marinnada, meelaha wiishashka iyo meelaha ka baxsan dhismaha
- Guryaha la faaruqiya ayaa waxaa laga saarayaa armaajooyinka, waxyaabaha dhulka saaran iyo waxyaabo kale oo guryaha kujira

Isbeddellada ku imaan doono baarkinada baabuurta la dhigto iyo wadooyinka ay dadka ku lugeeyaan

- Si loo xaqiijiyo in hawlaha shaqo ee kaabayaasha dhaqaalaha loogu fuliyo si ammaan ah, waxaa jiri doona isbedello lagu samayn doono baarkinnada baabuurta la dhigto iyo dariiqyada ay dadka lugeynayaa ku socdaan oo xaafada ku yaal
- Laga bilaabo horraanta bisha Luulyo, qayb ka mid ah baarkinada baabuurta la dhigto ee xiran (ilaa 30 baarkin) oo u dhow Holland Court ayaa dib loo furi doonaa
- Dariiqa lagu lugeeyo ee dhinka waqooyi ee 12 Holland Court ayaa la xiri doonaa muddo 5 asbuuc ah. Meel la maro ayaa dib looga furi doonaa baarkinada baabuurta la dhigto ayaana la soo celin doonaa marka shaqada la dhameeyo
- Waxaana sii socon doona isbedello lagu sameyn doono baarkinnada baabuurta marka shaqadu socoto
- Meelaha laga galo dhismayaalka waa ay furnaan doonaan. Meelaha ay ka galayaan baabuurta qashinka qaadeysa iyo kuwa gurmada degdega ayaa sii furnaan doona
- Tilmaamaha dadka haga ayaa goobta ooli doona si ay kaaga caawiso inaad tagto meesha aad u socoto

Kaabayaasha goobta oo ay shaqo ka socoto

- Waxaa laga yaabaa inaad aragto qalabka wax lagu duleeliyo, wax lagu qodo iyo sidoo kale kan wax lagu jaro iyo gawaari culus
- Jarjaridda iyo qodista si loo helo adeegyada jira isla markaasna loo hirgaliyo adeegyo cusub oo dhulka hoostiisa ah
- Waxaa la isticmaali doonaa qalabka wax lagu duleeliyo si loo qaado muunado ciid ah oo baaritaan lagu sameynayo
- Waxaa la isticmaali doonaa gawaarida waaweyn ee leh faakiyuum si meesha looga qaado ciida
- Dhirta iyo qaar ka mid ah geedaha in meesha laga saaro
- In meesha laga saaro oo meelo kale loo raro nalalka kor ku rakiban

Inaysan wax dhibaato ah kaa soo gaarin meelaha ay shaqadu ka socoto ee xaafadaada

Waxaan si joogto ah ula soconaa waxyaabaha ay ka mid yihiin shanqarta, boodhka iyo gariirka si wax kasta amaan u ahaadaan.

Ku wareega agagaaraha

- Marwalba inta aanan shaqada la bilaabin ka hor waxaa meesha lagu wareejin doonaa deyr
- Waan kuu sheegi doonaa goorta iyo goobaha aad ka filan karto baabuurta waaweyn ee xamuulka
- Marwalba raac calaamadaha si aad wadooyinka goobta ugu dhex socoto
- Raac tilmaamaha shaqaalaha baabuurta haga markay halkaas ku sugan yihiin si ay kuu caawiyaan

Si nabdoon in loo maareeyo alaabaha

- Nidaam amni oo adag ayaa marwalba jiri doona marka meesha laga saarayo lana nadiifinayo waxyaabaha khatarta keeni kara
- Calaamado wax sharaxaya ayaa marwalba goobta la dhigi doona si aad uga fogaato meelaha ay yaalaan waxyaabaha khatarta leh.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto shaqaalo xiran dhar jirka difaacaya

In la helo meelo laga geli karo

- Meelo ay ka geli karaan adeegyada gurmada degdega ah ayaa marwalba jiri doona
- Meelo laga geli karo baarkinada baabuurta la dhigto, oo ay ku jiraan baarkinada naafada, ayaa la heli doonaa
- Wadooyinka ku meelgaarka ah waxaa loo sameyn doonaa nalal iftiimiya

Shaqada aan qabano waxaa hagta saacadaha caadiyan la shaqeeyo ee u degan Golahaaga:

Isniin ilaa Jimce	Maalmaha sabtida
inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo	9-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo

Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha golaha deegaanka (council permit) si loo shaqeeyo wixii ka baxsan saacadaha balse waan lasoo socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Wixii shaqo ah oo dhan waxaa loo qabtaa si waafaqsan heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

Dadka deegaanka ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xiriiraan xafiiska guryaha ee deegaanka:

1300 360 462

ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au

